

## Amarka Sargaalka Caafimaadka Maxaliga ee Deegaanka King: XAQIJIINTA TALLAALKA

Deegaanka King wuxuu sii wajahayaa heerar sare ee kiisaska COVID-19 iyo isbitaal-jiifin, iyo dhimashooyin saa'iday oo caabuqa Delta uu keenay. Kiisaskaan iyo dhimashooyinka waxaa looga hortagi karaa tallaalka. Sidaa darteed, Sargaalka Caafimaadka Dadweynaha ee Public Health – Seattle & King County Dr. Jeff Duchin wuxuu soo saaray Amarka Sargaalka Caafimaadka Maxaligaa oo waajibinaya xaqiijinta tallaalka buuxa ama baaritaan COVID-19 laga waayay oo ku aadan kulamo iyo goobo gaar ah oo gudaha iyo bannaankaba ah. Tallaalku waa gaashaankeena ugu fiican ee ku lidka ah COVID-19.

### Sharciga cusub waxaa ka mid ah kuwa soo socda:

Laga bilaabo 25'ta Oktoobar, 2021, macaamiisha waxaa lagu waajibin doonaa inay tusaan caddeyn tallaalka COVID-19 ah oo FDA ama WHO oggoshahay markey galayaan:

- **Dhacdooyinka bannaanka** ee wata 500 oo qof ama ka badan (oo ay ku jiraan dhacdooyinka xirfadleyda, ciyaaraha jaamacadaha iyo madadaalada)
- **Dhacdooyinka ama goobaha ciyaaraha ee gudaha** ayadoon la fiirineyn tirada (oo ay ku jiraan ciyaaraha xirfadleyda, riwaayadaha iyo miyuusiga tooskaa, shaleemooyinka, meelaha jimicsiga iyo shirarka/muctamarrada)
- **Makhaayadaha iyo baararka.** Tan waxay quseysaa cunteynta gudaha. Ma quseyso cunto-cunista bannaanka, macaamiisha cuntada qaata, iyo meelaha inta badan aan loo isticmaalin cunteynta gudaha sida dukaamada cuntada. Amarku wuxuu siinayaa makhaayadaha iyo baararka yaryar ee leh awood fariisin 12 kursi ama ka-yar ikhtiyaar muddo dheer oo diyaargarow ah, oo wata taariikhda dhaqangelinta ee Diseembar 6.

Maxaa loo aqoonsadaa caddeyn tallaalka?

- Kaadh tallaalka ama sawir kaadh tallaalka ee CDC
- Shahaado daabacan ama Koodh QR ah (diyaar ah dhamaadka Sabteembar) ee laga helo [MyIRMobile.com](https://www.myirmobile.com) (bog Ingiriis keliya ku qoran)
- Diiwaan tallaalka kale oo rasmi ah oo Mareykan dhexdiisa ama bannaankiisa, oo ay ku jirto mid ka yimid dhaqtarkaaga. Sawir ama footo-koobi kaadhkaan waa la aqbali karaa sidookale.

**OGOW:** Qoraal ruqso caafimaad ama diimeed **lama** aqbalo. **Uma** baahnid inaad tusto aqoonsi la socda caddeynta tallaalka.

Ikhtiyaarrada dadka aan tallaalka ah ama kuwa aan awoodin inay caddeeyaan xaaladda tallaalka

Dadka aan tallaalka ah ama aan awoodin inay caddeeyaan xaaladda tallaalka waa inay muujiyaan caddeynta:

- baaritaan PCR COVID-19 ah oo lagaa waayay feyraska ee 72 saac ee la soo dhaafay gudahooda, ama natiijo baaritaan dhaqso ah oo feyraska lagaa waayay oo ka timid cudur-baare ku sameeyay goobta dhacdada ama meesha waxyar kahor gelitaanka.

Shirkadaha ayagaa masuul ka noqon doona fiirinta caddeynta tallaalka ama xaaladda baaritaan cudur laga waayay. Caafimaadka Dadweynaha wuxuu la shaqeyn doonaa iskaashatooyinka si loo siiyo ganacsiyada iyo hay'adaha taageero farsamo iyo agab waxbarasho oo lagu hirgelinayo amarka.

## Sameynta sharciga

King County iyo Caafimaadka Dadweynaha ayaa sharcigaan ku abuuray wada-tashiga Kooxda Cudurka Safmarka ah ee Caafimaadka Dadweynaha iyo Kooxda La-talinta Bulshada Midabtakoorka, magaaloooyinka, ganacsiyada yaryar, ururrada ganacsiga, ururrada shaqaalaha, hay'adaha suuqa, kooxaha ciyaaraha, shirarka, kooxaha jaaliyadaha, hogaamiyayaasha diimaha ee deegaankoo dhan. Waxay ku dadaalaan inay sameeyaan taa inay noqota wax u shaqeyn kara, cadaalad iyo sinnaana u ah ganacsiyada iyo dadka deegaanka.

**Macluumaad dheeraada: [kingcounty.gov/verify](https://kingcounty.gov/verify) (macluumaad tarjuman waa diyaar)**